

WAAN KU CAAWIN KARNAA

Ilmo badan ayaa ku dhashay ama qabi kara naafonimo caqabad ku ah koriinkooda caadiga ah iyo koriimadooda, ayagoo saamaynaaya guushooda dugsiga. Nasiib wanaag, qaar badan oo kamid ah xanuunadan ayaa laga caawin karaa haddii waalidiintu aqoonsadaan dhibaataada xili hore ayna raadsadaan caawimaad.

Haddii aad ka shakisan tahay in ilmahaagu qabi karo baahiyaha gaarka ah, wac midkood lambarada hoose. Haka waaban in aad isha ku hayso, iyo/ama aad raadsato tallo ku aadan habdhaqanno gaar ah ama dhibaatooyin laga yaabo in uu ilmahaagu waajahaayo.

Xasuusnoow, hadba inta aad xili hore aqoonsato baahiyaha gaarka ah ee ilmahaaga aadna u raadiso caawimaad, ayay kasii wayn tahay suuragalnimada ah in ilmahaaga la caawiyo.

. Barnaamijka Kentucky Early Intervention System (Nidaamka Caawimaada Dhalaanka ee Kentucky) iyo degmada dugsigaaga maxaliga ah ayaa u baahan inay wax ka ogaadaan dhammaan carruurta qaba caqabadaha, da'aha dhalashada ilaa 21 si loo qorsheeyo baahiyahooda gaarka ah.


Si aad u hesho xog dheeraad ah iyo caawimaad, la xirii:

**Kentucky Early Intervention System Program
(Barnaamijka Nidaamka Wax Ka Qabashada
Caruurnimada Hore ee Kentucky)**

Department for Public Health
(Waaxda Caafimaadka Dadweynaha)
275 E. Main St., HS2W-C
Frankfort, KY 40621
(502) 564-3756,
Laynka Lacag La'aanta ah - (877) 417-8377
(ama 1-877-41STEPS)
Fakiska: (502) 564-0329

**Kentucky Department of Education
(Waaxda Waxbarashada ee Kentucky)**

Da'aha 3-21
Office of Special Education and Early Learning
300 Sower Blvd.
Frankfort, KY 40601
502-564-4970



KA SOCOTA

MA TAQAANA A ILMO QABA BAAHIYAH A GAARKA AH?



Kentucky Department of Education
(Waaxda Waxbarashada ee Kentucky)

Calaamadaha soo socda ee bilawga hore ayaa ah qaar kamid ah astaamaha ugu badan ee caanka ah ee muujinaaya in baahi jirto. Hadii sabab kasta oo jirtaba aad ka shakisan tahay in ilmahaagu uu qabi karo baahiyaha gaarka ah, waxaan kugu boorinaynaa in aad caawimaad raadsato si degdeg ah. Ha sugin ilaa ilmahaagu ka gaaraayo dugsiga kahor inta aadan bilaabin inaad xal u hesho walaacaan.

MAQALKA

- Uma jeensanaayo dhanka uu ka yeero codadka uusan aqoon ama dhawaacyada marka uu gaaro 6 bilood jir.
- Wuxuu qabaa dhago xanuun dabo dheeraaday ama malac ka socota dhagaha.
- Wuxuu ku hadlaa cod ka dheer sida caadiga ah.
- Wuxuu u leexshaa hal dhag codka uu doonaayo inuu maqlo.

FAKARKA

- Kama falcaliyo magaciisa marka loo yeero marka uu gaaray 9 bilood jir.
- Ma awoodo inuu aqoonsado timaha, indhaha, dhagaha, sanki iyo afka marka loo timaamo marka uu gaaro 2 sano.
- Ma fahmaayo sheekooyinka fudud ee loo sheegay ama loo akhriyay marka uu gaaro 3 sano.

- Uma muuqdo inuu fahmaayo macnaha erayada "maanta," "bari" ama "shalay" marka uu gaaro da'da 5.
- Ma bixinaayo jawaabaha macquulka ah ee ku aadan su'aalaha sida "Maxaad samaysay markii aad hurday?" ama "Maxaad samaysaa marka aad gaajaysan tahay?" marka uu gaaro da'da 4.
- Ma heli karo erayo uu ku qeexo fikradihiisa si qeexan da' kastaba ha jiree.

ARAGA

- Uusan awoodin inuu gaaro uuna qabsado boonbalihiisa marka uu jiro 6 bilood.
- Badanaa ma awoodo inuu raadiyo uuna soo qaato waxyaabaha yaryar ee dhulka ku dhacay.
- Wuxuu badanaa xoqaa indhaha ama wuxuu ka cabtaa in indhuhu xanuunayaan.
- Wuxuu leeyahay indho gaduudatay, ilmo ka socoto ama xibraha indhu murxeen.
- Wuxuu madaxa u taagaa si togan ama qaab qaab daran (madaxa oo uu labada gees midkood u leexsho-madaxa oo uu horay ama gadaal u liicsho) marka uu iskudayaayo inuu eego qof ama sheey gaar ah.
- Wuxuu mararka qaar ama markasta ka mirig siiyaa midkood ama labada indhoodba.
- Wuxuu badanaa ka cawdaa caad ka saaran aragga iyo madax xanuun.



HADALKA

- Ma oran karo "Hooyo" ama "Aabe" marka uu gaaro 8 bilood.
- Ma sheegi karo magacyada dhawr boonbale iyo dhawr qof marka uu gaaro 2 sano.
- Kuma celin karo laxannada guud ama heesaha TV-ga marka uu gaaro 3 sano.
- Kuma hadlaayo jumlado gaaban marka uu gaaro 4 jir.
- Ma fahmayaan dadka ka baxsan qoyska marka uu gaaro 5 jir.
- Si faseex ah uguma dhawaaqi karo erayada; hadalka ayaa ciriiri ku ah uuna u dhahayaa si qaab daran da' kasta oo uu jiraba.

SOCODKA

- Ma awoodo in uu fariisto marka uu gaaro 9 bilood.
- Ma socon karo asagoo aan la caawin marka uu gaaro da'da 2 sano.
- Kor iyo hoos uguma socdo jaranjarada marka uu gaaro 3 jir.
- Ma awoodo in uu ku istaago hal lug muddo kooban marka uu gaaro 4 jir.
- Kor uma tuuri karo kubad mana qaban karo kubad wayn oo lagu soo tuuray marka uu gaaro 5 sano.
- Isbadal muuqda oo ku dhacay isku dubaridka; ma awoodo inuu bilaabo ama joojiyo dhaqdhaqaaqa.

DHEXGALITAANKA BULSHADA

- Ma dheelo ciyaaraha sida waving bye-bye, peek-a-boo, iyo pattycake marka uu gaaro 9 sano.
- Ma koobi gareeyo waalidiinta marka ay samaynayaan hawlaga joogtada ah ee guriga marka uu gaaro 2 jir.
- Kuma raaxaysto ku ciyaarista boonbalayaasha, tuujiyada iyo digsiyada, ciida, iwm. marka uu 2 jir yahay.
- Ma dheelo ciyaarta kooxda sida dhuumashada iyo raadinta, kubada tag, iwm. markuu 3 jir yahay.
- Cidna wax lama wadaago mana aqbalo moogaalaysiga marka uu gaaro 5 sano.
- Wuxuu u muuqdaa in ay ku dhacday isbadelka shakhsiyadda ama dareenka.